

Qaabab looga Qayb qaadan karo U doodista Lidka ku ah Gudniinka Gabdhaha

Waxaa jira qaabab baddan oo kor loogu qaadi karo wacyi gelinta iyo u doodista lidka ku ah Gudniinka Gabdhaha ee dhammaan waddanka oo dhan!

Dabaal deg!

- ⌚ Maalinta Caalamiga ah ee aan Loo Dulqaadan karin Gudniinka Gabdhaha/Gudniinka waa 6da Febraayo! Kaqayb qaado wacyi gelinta jaaliyadaada si ay u joojiyan #EndFGM (#Jooji Gudniinka Gabdhaha).
- ⌚ Kaqayb qaado Maalinta Caalamiga ah ee Gabadha llamaha maalinta 11ka Oktoobar midaas oo ay u dabaal degaan gabdhaha adduunka oo dhan ku nool in ay sheegaan baahidooda iyo caqabadaha ay la kulmaan halka ayna dhiiragelinayaan awood siinta dumarka.

Barro!

- 📖 Amref waxay diirada saaraysaa Caadooyinka Bedelka ah ee Gelida Qaan gaarnimad ee ka jirta Tanzania iyo Kenya.
- 📖 Sahiyo waxay u shaqaysaa in ay jaaliyadaha barto oona ku wacyi geliso tooska sheegida sheekooyinka.
- 📖 Mashruuca Orchid wuxuu aamin sanyaay in waxbarashadu ay tahay tallaabada ugu horaysa ee lagu joojin karo Gudniinka Gabdhaha.

Tallaabo ku qaad gudaha Dalka Maraykanka!

- Wuxaan dad ku caawin kartaa in la bedelo siyaasada si loogu joojiyo Gudniinka Gabdhaha gudaha Dalka Maraykanka adiga oo kaqayb qaata Sinaanta Hadda ah [Ololaha Lagu Joojinayo Gudniinka Gabdhaha](#).
- [The AHA Foundation \(Mu'asasada AHA\)](#) waxay ku shaqaynaysaa si loo bedelo siyaasada ka jirta gobol kasta si loo hubsado ammaanka gabdhaha oo dhan.

Tallaabo ku qaad adduunka oo dhan!

- [The Girl Generation: \(Jiilka Gabadha\): Si loogu Joojiyo si Wadajir ah Gudniinka Gabdhaha](#) waxay u dabaal degaysaa dhaq-dhaqaaqa hoggaamiyo-Afrika si loo joojiyo Gudniinka Gabdhaha hal jiil. Kaqayb qaado dhaq-dhaqaaqa, fiiri sida ay gabdhaha adduunka oo dhan ku nool u samaynayaan isbedel iyo sida aad adigana ku samayn kartid!
- Join [Youth For Change \(Dhallinyarada Isbedel Doonka ah\)](#) ay la samaynayaan iskaashi dowladaha iyo ururada ka jira adduunka oo dhan si loo joojiyo xad gudubka kusalaysan-nooca qofka, ay kamid tahay Gudniinka Gabdhaha.
- [Integrate UK \(Dhexgalka UK\)](#) waxay isticmaalaysaa waxbarasho si ay awood ugu siiso dhallinyarada in ay tallaabo qaadaan. Xogagooda waxay u oggolaanayaan dhallinyarada dhigta iskuulada in ay ka wacyi geliyaan Gudniinka Gabdhaha iyo sida iyo meesha ay ka raadin karaan caawimaad haddii ay u baahdaan.



Kusoo biir Dumarka iyo Gabdhaha Adduu nka oo dhan ah Adduu nka wuxuu Leeyahay Maya Gudniinka Gabdhaha

Waxaa jira dhaqan ka aamusid Gudniinka Gabdhaha ah. Haddii kasoo hor jeesatid oona dhahdid, 'midaan aniga ayay igu dhacday' dadku way isoo firin doonaan, laakiin waa in uu qof u istaago oona dhaho, 'midaan uma oggolaanayo in ay sii jirto.' Midaan waa xad gudub lagu xad gudbo xuquuqaha aadanaha waana in la joojiyo. Illaa ay ka noqoto waxbarashada gabadha mid xaq ah oona ahayn wax mudnaan ah waxaynu guuldaro usoo hoynaynaa dumarkeena.

Jaha Dukureh,

**Waxaa loo soo sharaxay Abaal marinta Nobel ee Nabbada
ku saabsan, Waxay Aasaastay Safe Hands for Girls
(Gacmaha Ammaanka ah ee loogu talogalay Gabdhaha)**

Aniga waxaa la igu sameeyay gudniinka gabdhaha mana oggayn waxa ay ahayd ... Waxaa la ii sheegay in ay iga dhigayso haweenay. Waxbarashadaydu waxay awood ii siisay in aan barto waxyaabaha gudniinka ku saabsan haddana aniga waan kasoo horjeedaa waxaan u taaganahay in aanan gabar kale lagu samaynin ... Marka aynu firino carruurta waxaynu arkayaan carruur, ma arkayno ra'iisal wasaaraha xiga. Laakiin haddii aynu biloowno bedelida qaabka aynu u aragno, oona u firino sida mustaqbalka, waxay bedelaysaa gebi ahaanba qaabka aad wax u baraysid.

**Dr. Kakenya Ntkaiya,
Aasaasaha iyo Madaxa Kakenya's Dream (Riyada Kakenya)**


Rajadaydu waxay tahay in gabadh kasta oo yar ay noqoto haweenayda ay ku riyoonayso. Haddii ay dhab ahaantii doonayso in ay noqoto dhakhtar ama macalin, Waaan doonayaa in aan hubsado in aynu siinayno booskaasi. Waxaynu ka ilaalinaynaa dhammaan waxyabahaan dhibaatada leh, ayaguna waxay awoodaan in ay noqdaan wax kasta oo ay doonayaan in ay noqdaan noloshooda

Nice Leng'ete,
100ka Qof Ee Ugu Saameynta Baddan
Sannadka 2018 Ee Joornaalka Time

Dhammaanteenu waxay leenahay cod mudan in la maqlo sidaas darteeda waxaa ina saaran mas'uuliyada aynu ugu isticmaalayno sida ugu wanaagsan. Sidaas darteeda, Anigu waxaan dooranayaa in aan u isticmaalo codkayga nafsadayda iyo dhammaan dumarka oo dhan kuwaas oo la aamusan culeyska dhaqanka ee saaran darteeda.

Priya Ahluwalia,
ardayad dhigata Machadka Tata ee
Cilmiga Bulshada - Mumbai





Qalbiga kasoo baxa gaarana Qalbiga



Ma doonaysaa in aad ku lug lahaatid dadaalada kahor taga iyo u doodista lidka ku ah Gudniinka Gabdhaha? Maxay yihiin qaababka aad doonaysid in aad uga qayb qaadatid?

Maxay yihiin waxyaabaha aad u samayn kartaan si wada jir ah ahaanshihiina hooyo iyo gabadheeda si aad dadka ugu caawisaan joojinta Gudniinka Gabdhaha?

Maka noqon kartaa u doode dhaqankaaga?
Maxay yihiin baahooyinka ay qabto jaaliyadaada?

